

## Soomku yuu waajib ku yahay ?

Soomku wuxuu ku waajib noqonayaa qofka kasta oo Muslim ah , oo qaangaarey, oo cagligiisa qaba , oo qaadir ah oo soomka kara, oo muqiim ah waddankiisa iyo meeshiisa dhegan oo waxyaalaha soomka diidan ka madhan.

- **Muslim** – Markaynu nidhi Muslim waxa meesha ka baxaaya kii kaafirka ahaa. Kaafirka soomku waajib ku ma aha marka la leeyahay macneheedu waxa weeyi intaa uu kaafirka uu yahay soom la odhan maayo illeen laga aqbali maayo. Hadduu islaamana soomkii wakhtigaa gaalnimada dhaafey qallee lama odhanaayo. Hase ahaadee qofku hadduu soo islaamo maalin Ramadan dhexdeed iyada oo maalintaa aanay dhamaanin waxa waajib ku ah wakhtigaa uu islaamey laga bilaabo in uu joojiyo waxyaabihii soomka burinaayey ee qofka saaimka ah ka mamnuuc ah illaa ay maalintaa ay dhamaaneyso waayo waxa uu ka mid noqdey dadkii uu soomku ku waajibbeyey ayuu ka mid noqdey.

- **Caaqil** – Markaynu nidhi qofku waa in uu caaqil noqdo waxa meesha ka baxaya qofkii waalnaa. Kaa waalan waxa la mida qofka sac sac ah ama dhandhaanka aanu u yaqaano kaa waalan ayuu la xukum yahay oo isaga soom kuma waajib ah. Waxa la mida qofka weyn ee gaboobey ee asaasaqey isaga waxaa uu la xukunyahay majnuunka isagana soom waajib kuma aha. Haddii u hadhow soo miyirsado soomkii waalida ku dhaafey in uu qalleeyo lagama rabo, wax kaffaara ah ama fidyo ah la weydiineyo ma jirto. Hadduu yahay qof marna maalin waasha maalina miyirku u soo noqdo oo waxa ay noqoneysaa maalinta uu waalan yahay soom waajib ku ma aha, maalinta uu miyirsadona la odhan maayo shalay buu waalnaa ee soomkii ayaa laga rabaa maalintaas.

- **Baaliq-Qaangaarey**- Markaynu nidhi qofku baaliq ah qaangaarey waxa meeshaasi ka baxeya soon aan lagu lahayn qofkii yaraa ee aan qaangaarin. Qaangaarku calaamado ayuu leeyahay. Calamadihiisa waxa ka mid ah

- in uu qofku 15 sanno u dhamaato,
- timaha hoose qofka in ay u soo baxaan ama nin hanoqdo ama dumar
- in uu yeesho biyihii shahwadda
- gabadhii in lagu arko dhiigii xaydka

### **Calamadaha qofka marka laga helo waa qof baaliq ah.**

Waxaan baraarujineyaa in dadka waa weyn iyo kuwa yar yariba aaney u fahmin uun marka la leeyahay qaan gaar in uu yahay 15 jir keliya. Qofka isaga oo aanan 15jir gaadhin oo laga yaabo gabadhii in ay 9 jir tahay, inankiina in 10 jir uu yahay ayuu qaangaari karaa waayo calaamada qaangaarku maaha 15 jir in uu gaadho uun keliya. Calamadaha kale haddii lagu arko qofkii qof baaliq ah ayuu noqoneyaa.

Caruurta aan qaangaarin soomku waajib ku ma aha laakin dadka waalidiinta waxa la gudboon in ay caruurtooda soomka faraan haddey kareyaan caruurto gaar ahaan marka ay 7 jir ay gaadhaan. Haddii ay caruurto 10 jir gaadhaan Ahlul cilmiga qaarkood waxay yidhaahdeen soom la'aanta waa lagu garaaceyaa sida salaad la'aanta lagu garaaceyo oo soomkii iyo salaaddii taas way ka siman yihiin. Waxa dhici karta in uu qofkii yaraa qaangaaro iyada oo maalintii ramadaan dexda laga jiro, haddii markiisa hore uu soomanaa soomkiisi wuu dameystireyaa oo qaybta qaangaarka ka hor dhacday soom sunnah ayey noqoneysaa. Qeybtaasi marka uu qaangaaro soomki dhacdey soomkii faralka ayey noqoneysaa, wax qadaa ah ama wax qalleyn ah looga baahan yahayna ma jirto waayo intaasaa maalintaa waajib ku aheyd intiina wuu guttey. Haddii aanu soomanayn isaga oo maalin ramadaan dexdeed qaangaaro wakhtigaa uu qaangaarey calaamaddii uu isku arkey laga bilaabo ayaa ilmaha yari uu imsaak sameyneyaa macnaha wuu joojineyaa waxyaalihii soomka burinaayey. Maalintaasina in uu qalleeyo loogama baahna waayo kama uu mid ahayn dadka soomku waajib uu ku yahay kama uu mid ahayn maalintaasi marka ay bilaabmatay. Ilmihii yaraa hadhow marka uu qaangaaro lama odhaneyo qallee soomkii ku dhaafey markii aanad qaangaarin, wax fidya ah lama weydiineyo.

- **Muqiim** ah qof waddankiisa dagan oo jooga waa in uu noqdo. Waxa halkaa ka baxeya qofkii musaafirka ahaa. Soom waajib kuma aha qofka musaafirka ah laakin waxa laga rabaa soomkii safarka ku dhaafey in uu qalleeyo. Soomkuna xaaram ka ma aha qofka musaafirka ah ee waa uu soomi karaa haddii aanan dhibaato ku keeneyn. Haddiise soomku barar iyo dhibaato ku keeneyo mamnuuc ayuu soomku ka noqoneyaa qofkii musaafirka ahaa.

### ***Waxa muhim ah in la ogaado maxaa safar noqoneya ?***

Safarka waxa xadeyneya curfiga caadada dadku meeshay dadku ay yidahaan masaafada dadku ay u yaqaanin safar. Sharcigu xad uma yeelin safarka masafada safar noqoneysa. Qofka musaafirka ah waxaa u banaan in uu afuro ama ha ahaado mid soomka kareya ama mid aan kareyn, soomku ha dhibaateeyo ama yaanu dhibaateynin, ha ahadoo safarkaasi mid adag ama mid raaxa ah.

Haddii uu qofkii musaafirka ahaa uu soo maro waddan aan waddaankiisa aanan ahayn waddaankii muqiimka ku ahaa mid aanu ahayn musaafir ayaa uu weli xisaabsan yahay in uu ka istaago waxyaalihii soomka ka burineyey waajib ku ma aha illaa uu niyoodo mooyaan in uu waddankaa degeyo. Tusaale ahaan waxaad ka safartay hargeisa waxaad u socotaa Makkah, waxaad sii martey Dubai, Dubai marka aad sii martey intaad dubai joogtey musaafir baad tahay axkaam musaafir baad yeelanaysaa. Laakin haddaad niyootey in aad Dubai iska degto marka waxaa aad la xukum noqoneysaa dadkii Dubai ee qof muqiim ah ayaad noqoneysaa. Qofku hadduu soomo maalinta galinkeeda hore dabadeedna ay la muuqato in uu safro oo uu safar

bilaabo isaga marka hore soomanaa ee muqiim ahaa in uu afuro ayaa u banaan oo soomkiisa uu jabiyo.

### ***Goorma laga bilaabo ayaa uu afuri karaa ?***

Sida ku soo aruurtey Xadiith Anas oo saxiixa ah wuxuu afuri karaa marka uu shaygii uu ku safraayey uu diyaarsado ee lugta uu saaro ee safar u xidhxidho walow magaalada dexdeeda ha joogee. Qawlkaasi ayaa saxiix ah xadiitkaasi uu ayideyo saxaabada qaarkood ay semeeyen . Qofka musaafirka ahi hadduu soo galo meesha uu muqiimka ku ahaa ee uu degnaa yadoo maalintii ramadaan lagu jiro culumada qaarkood waxa ay yidahdeen maalintaa intaa ka hadhay waa in uu iska daayaa waxyaalihii soomka burinaayey laakin sida raajixa ah waajib ku ma ah. Ibn Mascuud رضي الله عنه wuxuu yidhi “من أكل أول النهار فليأكل آخره” ”Maalinta awalkeeda qofka cunaa, aakhirkeeda ha cuno” Macnaha wuxuu noqoneyaa wixii uu maalintaa awalkeeda cuno ayaa u banneyneya maalinta aakhirkeeda in uu cuno.

### ***Qofku haddii uu soomkii dal ku bilaabo, oo beled kale u safro labada waddan ay ku kala duwan yiheen wakhtiga la soomey muxuu sameyneyaa ?***

Tusaale ahaan hargeisa ayuu maanta soomki ku bilaabey dabadeedna wuu safrey bishii ramadaan aanan wali dhamaan wuxuu tegey waddamo maanta soomin oo beritoole kale soomkooda ka bilaabey, Maalinta ay yagu 30 dhameyneyso 31 ayey u tahay.Haddii ay yagii 29 ku dhamaato maalin buu daafiyey 30.

Waxa ay Ahlul cilmigu yidahdeen marba baladka uu joogay ayuu la xukum noqoneyaa. Marka uu maanta hargeisa joogo laga soo bilaabo waa in uu soomo. Hadduu tego waddan kale oo maalin ka dambeeya waddankii uu ku soomeyna wuula dhameystireyaa walowba 31 haku gaadhee. Haddii iyagu ay ka horreeyaana maalinta ay ciidaan ayuu la ciideyaa, soomkiisina nuqsan baa ku jirta oo bacdal ciid ayuu qalleyneyaa. Arinkaana waxa u daleel ah Rasuulku صلى الله عليه وسلم wuxuu yidhi

«صومكم يوم تصومون وفطركم يوم تفترون» Soomkiinu waa maalinta aad soomeysaan (macnaha waxa la soomeyaa jamaacatu naas) afurkiinuna wuxuu dhaceyaa maalinta aad afureysaan ( macnaha jamaacada ayaa la la afureyaa). Suurto gal ma aha qofku isagu ha uba arkeyo in uu isagu saxsan yahay sharcan u ma banaana jamaacatu naas in uu khilaafu.

- **Caafimaad qabo-** Markaynu nidhi qofku waan i uu yahay mid caafimaad qaba waxa halkaa naga soo baxeysa qofkii bukey ee xanuusaneyey in aanu soomku waajib ku ahayn. Laakin waxa is weydiin leh xanuunkee baa aaney waajib ku noqoneyn soomku ? Xanuun kasta oo qofku uu ka baxo xadkii caafimaadka oo la odhaneyo wuu bukaa qofka waxa u banaan marka uu ku dhaco in uu afuro xanuunkaasina waa xanuun barar naftiisa ku

keeneya ama xanuunkii ku sii kordhinaaya ama qofka bogshadiisa dib u dhacdo keensaneya. Xanuunka soomku aanan raadeyneyn sida tusaale ahaan qofkii duri yar uu hayo oo uu yar gufaceyo ama madax xanuun yar uu hayo xanuunkaa noocasi ah qofka aan soomkiisa raadeyneyn ee ay qofkii isku mid tahay hadduu soomo iyo haduu iska daayo xanuunkaasi ma ahaa xanuunkii ruqsadda caynkaa lagu helaayey. Hadaba xanuunku laba ayuu u qeybsamaa.

Xanuun aan la rajeyneyn in laga bogsado sideeba lagu garaneyaa ama lagu ogaaneyaa in uu yahay xanuun laga bogsaneyn aan la rajeynin ?

Waxa lagu garaneyaa caado. Sidaasoo kale dadka dakhaatiirta ah ee lagu kalsoon yahay haddii ay sheegaan xanuunkaasi in uu yahay xanuun aan laga bogsan xanuunkaasi wuxuu noqoneyaa mid xanuunka noocaasi lagu tiriyoo. Markaa hadduu yahay xanuun in laga bogsadaa aan la rajayneyn qofkii soom waajib ku noqon maayo. Waxaana waajib ku noqoneysa maalinkasta in uu quudiyo qof miskiin ah. Quudintu waxa ay ku soo xaasileysaa waxkasta oo dacaam la yidaah ama timir ha noqoto, bur, bariis, baasto, wax kasta oo dacaam la yidaah. Waxayna ahlul cilmigu yidahdeen waxa fiican in la bixiyo waxa baladka laga guudo ee la isticmaalo.

### ***Intee in leeg buu siineyaa ?***

Sharcigu muu xadin wuu idlaaqey miskiin quudintu buu yidhi sharcigu saas awgeed bay yidahdeen ahlul cilmigu in badan oo kamid ahi miskiin cunto ku filan uu ku dhergo ayuu siineyaa. Culumada qaarkood waxa ay yidhaahdeen ma waxaan ka qiyaas qaadaneynaa fidyada xajjka oo ninka sameeya wax yaalaxa maxduuraadu ixraam wax ka mid ah xadiiska Kacab Ibn Cujrah ku soo aroortey oo la yidhi waxaad quudisaa lix miskiin mid walbana waxaad siisaa saac. Fidyadu waa isku mid bay yidhaahdeen baabka soomka hala joogo ama xajjka markaa saac baa la siineyaa miskiinkii saacana culumadu marka ay qadaraan waxa ay yidahdeen waa kiilo iyo badh laakin sida wanaagsani waxa weeyi miskiinka raashin bisil oo uu cuno in aad siiso hal mar. Waayo haddaad kiilo iyo badh bariis aa siiso kiilo iyo badh bariis qalalan sidee buu odhan doonaa? saliid buu u baahan yahay oo tomaandho uun baahan yahay , oo basal ayuu u baahan yahay sidee buu odhan ? idcaamkii ma dhameystirna cunto qalalan marka aad siiso. Waxa waanagsan raashin bisil uu cuno aad siiso. Shardi ma aha in aad hal mar aad wada bixiso, hal mar baad bixin kartaa, waad kala kaxeeyn kartaa, miskiin quudha ayad siini kartaa , masaakin kala duwan ayaad siini kartaa. Haddii uu qofkii uu afuro ramadaan xanuun haya awgeed, xanuunkaasi oo marka hore loo fileyey xanuun aan laga bogsan sida ay caadadu ay keensaneyo ama dhakhaatiirta lagu kalsoonyahay ay sheegeen oo sidaa masaakin quudiyo oo dabadeed dhacdo in Ilaahay caafimaad u qadarey. Maan odhaneynaa xanuunkaasi mid laga bogsaney ayuu ahaaye soomkii ku dhaafey masaakinta aad ka quudisey qallee oo ku soo celi ?

Maya lama odhaneyo waayo maalintaa xaalkiisa siduu ahaa ayuu ku xisaabtamay intii Ilaahay ku kallifey ee ku waajib yeeley uu sameeyey, sida xaalku isku badaley ayuu ku dhaqmayaa marka uu

caafimaad helo odhan maayo xanuun aan laga bogsan ayaa i hayn jirey maalintaa u caafimaad u helo laga bilaabo in uu soomkii bilaabo ayay noqoneysaa. Waxa dhici karta in uu qofku miyir doorsoomo ama uu suuxo dadka caynkaasi xukumkoodu muxuu noqoneya ?

Miyir doorsoomkaasi wuxuu la xukum noqoneyaa waalida oo hadhow toole qofkaasi wax qadaa ah laga rabo ma jirto wax fitya ah la weydiineyana ma jirto illaa miyir doorsanka wakhtigiisa uu yar yahay mooyaan sida maalin ama laba maalmood ama ugu badnaa saddex oo ah inta qofku uu hurdi karo intaa wax la dhaaf saddex maalmood ka sarreeya xukunka majnuunka ayuu noqoneyaa.

Laakin haddii uu saacado yar ama maalin ama laba maalmood uu miyir doorsanaa ka dib uu soo miyiraabey soomkii wakhtigaasi dhaafey in uu qalleeyo ayaa ay noqoneysaa. Haddii ay qofka ku dhacdo gaajo xoog weyn ama haraad daran oo uu naftiisa u baqo ama uu ka baqo in dareemadiisa qaar ka mid ah tagaan in uu afuro ayaa u banaan qofkaa, maalintaasi wuu qalleyneyaa. Sababtu waxa ay tahay nafta in la xifdiyaa ayaa waajib ah oo la ilaaliyo. Dadka haraadey ee gaajooneya ama daal fara badan qabsaneya ama xanuun ku dhaco ka baqaneya iyo dadka shaqooyinka adag haya uma banaana in ay iska afuraan is moodsiin qudha illaa in ay gaadhayaan xaalka naftooda u baqaan. Qofkii bukey haddii maalinta dhexdeedi Ilaahay u shaafiyo oo uu caafimaado in uu iska daayo wax yaalihii soomka burineyey waajib ku ma aha laakin waxaaa waajib ku ah maalinta in uu qalleeyo.

- **Qaadir-** Qofku waa in uu qaadir noqdo. Qaadirkaasi waxaa ku baxeya qofka awooda leh soomka waajibka ku ah. Hadaanu awood lahayn soomku waajib ku ma aha. sida qofkii weynaa ama oday ha noqdo ama islaan ee gaboobey ee ay awoodiisu tegtey ee laga quustey maalin in uu soomo awood u yeesho qofka caynkaasi soomku waajib ku ma aha. Hase ahaatee waxa ku waajib ah miskiin in uu quudiyo. Haduu waayo wax uu ku quudiyo wax allaale waajib soomkuna wuu ka dhaceyaa awood la aan awgeed. Dadka waa weyni laba ayey u qeybsameyaan kuwan imiga aynu sheegeyno waa kuwa maankoodi qaba ee aan asaasaqin awood darro ayuun baa haysa maskaxdiisa waa leeyahay kaasi ayaa miskiin quudineya oo maalinkasta miskiin quudinta ku badeleya. Laakin hadduu asaasaqo qofkii weynaa oo isku dhex yaaco kii waalnaa buu la xukum yahay soomna laga marabo, in uu qalleeyaana waajib maaha, in uu fityo bixii waajibna kuma aha. Waxa halkaa baraarujineyaa marka lagu yidhi waa in miskiin la quudiyo ma banaana ayey yidhaadeen culumadda kaana gudi mayso in aad lacag bixisaa oo aad miskiinkii lacag siisaa waayo Ilaahay icdaam buu ka cabirey quudintii Ilaahay uu sheegey waa in aad sameysaa.

- **Qofka soomka ku waajibey waa qofka waxyaabihii soomka u diideyey ka maqan** Waxyaabaha soomka diidaa dumar ayey la xidhidan waa xayd iyo nifaas. Gabadhii xaaram buu ka noqoneyaa soomku labadaa arimood inta ay ku sifaysantahay. In soomkii ay qalleyso ayaa waajib ku ah maalmaha caynkaasi ku dhaafey sida axaadiitha saxiixa ku tusineyso. Rasuulku صلى الله عليه و سلم ” wuxuu yidhi ” ”أليس إذا حاضت المرأة لم تصل ولم تصم؟“

Gabadhu miyeynan ahayn mid aan tukaneyn aanan soomayn?

Caaisha رضي الله عنها waxa ay tidhi ” كنا نؤمر بقضاء الصوم ولا نؤمر بقضاء الصلاة ”

”Waxaa lana fari jirey in aanu soomkii qalleyno nugu dhaafey xaaladda gabadhu ay dhiiga leedahay laakin salaaddii nala ma farin in aanu qalleyno. ”

Waxan halkaan baraarujineyaa dumarka muhiim ay tahay ragguna in ay ogaadaan si ay dumarkooda u fatwoodaan dumarkuna ay ogaadaan si ay ugu camal falaan. Gabadhu haddii ay ka daahiri weydo xayd iyo nifaas waagu intaanu beryin ka hor yaanay meydhan bee in ay soomtaa waajib bay ku tahay. Waxa xaydku iyo nifaasku ka go’ay intaanu waagu dilaacin laakin weli kama ay meydhan. Meydhashadu soomku u ma baahna sida salaadda ee dhiigaas ayey is diidsan yihiin dhiigaasi marka uu go’ soomkii baa laga rabaa gabadhii. Waa mas’alo muhim ah loo baahan yahay dumarka lagu baraarujiyo laakin waxa muhin in ay yaqeensato in uu ka qo’ay dhiigaasi.

Gabadhu haddii u xaydki u yimaado qoraxdii oo aanan dhicin inyar ka hor maalintii dhan wey soomaneyd xaydkii baa ka yimid ama nifaaskii daqiiqo waaxid yadoo ay ka hadhsan tahay dhicitaanka qoraxda soomkeedu waa u bureyaa. Gabadhu hadday marka ay qoraxdu dhacdo oo u yimaado xaydkii ama nifaaskii yeyba tukanin yeyba wax cunin mar qoraxdii oo dacday arinkaasi u yimaado soomkeedu waa saxiix burina maayo. Gabadhii dashay haddii uu ka qo’o dhiigi dhalmadu 40 kii malmood iyada oo aanan u dhamaanin wey soomeysaa. Dhiiga dabarfuranka isagu wax raad ah ku ma leh soomka iyo salaadda toona, gabadhu waa ay tukanaysaa intaa u ka socdo laakinse salaad kasta wey u weyseysaneysaa soomkeedina sidii caadigeedi ayey u wadaneysaa. Dammul xayd iyo nifaas ayaa soomka ka hor istaaga.

**Muxaadaradii Axkaamta Soomka: Qeybtii 1aad Uu Soo Jeediyey Sheeykh Cabdullaahi Xassan Xaashi Barbarawi {Xafidahullaah}**

**Waxaad ka haleysaa cajalada oo duuban [www. Manhajonline.com](http://www.Manhajonline.com)**

Waxa qortey :Umm Zayd As Somaaliyyah As Salafiyyah

مِنْهَاجِي

[www.ManhajOnline.com](http://www.ManhajOnline.com)   [www.twitter.com/manhajonline](https://www.twitter.com/manhajonline)   [www.facebook.com/daarulxadiith](https://www.facebook.com/daarulxadiith)